



Hagaha Luqadaha badan ee Vantaa


Dhawaan miyaad u soo guurtay wadanka Finland? Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada ka jira Vantaa? Ku soo dhawoow hagahayaga luuqadaha badan ku qoran!

Hagitaanka iyo la-talinta, tusaale ahaan:

- shaqada iyo waxbarashada
- adeegyada dowladda iyo fahamka go'aannada
- buuxinta foomamka
- adeegyada elektaroonigga ah (adeegyada dijitaalka ah)
- u guurista Vantaa
- ku noolaanshaha Vantaa
- hiwaayadaha iyo madadaalada

Waxaa hagitaanka luqadaha badan leh Myyrmäki, Tikkurila, looga heli karaa khadka taleefanka iyo iimayl ahaan.

Adeegga hagitaanku wuxuu u furan yahay dhammaan dadka degan Vantaa ee ku hadla luqadaha badan. Hagitaanku waa mid bilaash ah.



vantaa.fi/monikielinenneuvonta

Hagitaanka luqadaha badan leh ee laga helo Tikkurila

cinwaanka: Vernissakatu 1

ISNIINTA ballan la'aan la imanaya	TALAADADA ballan oo kaliya lagu imaanaa	ARBACADA ballan la'aan la imanaya	KHAMIISTA ballan oo kaliya lagu imaanaa	JIMCAHA ballan la'aan la imanaya
9.00–15.00	9.00–15.00	9.00–15.00	11.00–15.00	10.00–15.00

Hagitaanka luqadaha badan leh ee laga helo Myyrmäki

cinwaanka: Myyrmäkitalo, Paalutori 3

ISNIINTA ballan la'aan la imanaya	TALAADADA ballan oo kaliya lagu imaanaa	ARBACADA ballan la'aan la imanaya	KHAMIISTA ballan oo kaliya lagu imaanaa	JIMCAHA ballan la'aan la imanaya
9.00–15.00	9.00–15.00	9.00–15.00	12.00–17.00	10.00–15.00

Maalmaha Isniinta, Arbacada iyo Jimcaha, hagitaanka **ballan la'aan ayaa lagu qabanaaya** Myyrmäki iyo Tikkurila. Maalmahan, waxaan kuugu adeegaynaa luqadaha Finnishka, Iswidishka iyo Ingiriiska fudud. Helitaanka luqadaha kale ee adeegga khubaradeena way kala duwan yihiin. Haddii loo baahdo, waxaanu isticmaalaynaa turjumaan taleefan.

Maalmaha Talaadada iyo Khamiista, hagitaanka **waxaa lagu qabanaaya ballan oo keliya**. Ballan ahaan, khubaradeena waxaa la heli karaa iyagoo ku hadlaayo luuqadaha Albaaniya, Carabi, Dari, Ingiriis, Farsi, Talyaani, Iswidish, Soomaali, Finish, Yukreeniyaan, Ruush iyo Istooniya. Haddii loo baahdo, waxaanu isticmaalaynaa turjumaan taleefan.



Waa sidaan qaabka aad ballanta u qabsan karto:

- Na soo booqo Isniinta, Arbacada ama Jimcaha, ama
- Na soo wac, ama
- Iimayl ahaan noogu soo dir codsigaga ballanta. Fadlan na sii lambarka taleefankaaga, si aan kuula soo xiriirno.

Nagala soo xiriir: taleefan iyo iimayl

- 09 839 50930 (Isniinta–Arbacada 9–15.30, Khamiista 12–15.30, Jimcaha 10–15.30)
- monikielinen.neuvonta@vantaa.fi